



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 278/3/1/14:الرقم:

Mogadishu June 19, 2014 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hantidhowraha Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-U-Eegista Dastuurka
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud Ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda.
L/H. Golaha Shacabka.

Ujeedo: Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan Ee Dib-u-eegista
iyo Hirgelinta Dastuurka.

M.ne Madaxweyne;

Waxaan halkan kuugu soo lifaaqay Qaraar Golaha Shacabka Lam. GSH/12/14 ee 19 Juun 2014
kuna saabsan Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta
Dastuurka.

Waxaan si sharaf leh kaaga codsanaynaa in Xeer Madaxweyne ku oggolaato kuna soo saarto
Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka
sida ku-meel-gaarka ah loo ansixiyey.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MI/AM

**ANSIXINTA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DIB-
U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA**

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 153: Oggol (134)- Diidmo (9)- ka aamustay (10)



Taariikh: Juun 19,2014

Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS



Taariikh: Juun 19,2014

Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur Iika

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Taariikh: Juun 19,2014

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

ANSIXINTA XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN

EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA

Muqdisho, 19 Juun 2014

GOLAHA SHACABKA:

Markuu Arkey: Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/GB/00.945/05/14 kuna taariikhsan 29/05/2014 oo Golaha soo gaartay 03/06/2014 kuna saabsan codsi Ansixinta Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo soojeedinta Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Lam. WCD/XW/00065/14 ee 29/05/2014 kuna saabsan isla ujeeddada kor ku xusan;

Markuu Arkey: Sharciga Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka Lam. 119 ee 7da Agoosto 2013;

Markuu Ka baaraandegay: Taariikh nololeedka xubnaha magacaabistooda loo soojeediyey in ay ka mid noqdaan Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

Asaga oo ku kulansan: kalfadhiga 4-aad kulankiisa 39-aad ee 19 Juun 2014:


Qodobka 1aad:

Iyada oo ay goob joog yihiin 153 Xildhibaan oo codeenayey wuxuu xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka halkan hoose ku xusan ku Ansixiyey 134 cod oo Oggol ah, 9 diidey iyo 10 Xildhibaan oo ka Aamustay:

- | | |
|---------------------------------------|-------|
| 1. Marwo Caasho Geelle Diiriye | Xubin |
| 2. M.ne Prof. Xasan Cumar Mahadalleh | Xubin |
| 3. M.ne Cusmaan Jaamac Cali "Kalluun" | Xubin |
| 4. M.ne Avv. Maxamed Cabdalla Saalax | Xubin |
| 5. M.ne Avv. Xasan Xuseen Xaaji | Xubin |

Qodobka 2aad:

Waxaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Golaha ku oggolaado Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida ku-meel-gaarka loo ansixiyey.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

